

In lagaa helay COVID-19 oo aad bosatiif noqatid si amaan ah ugu maareynta COVID-19 guriga.

Haddii uu kugu sheego baaritaanka antigen ka degdega ah inaad bosatiif, waa inaad:

1. Ka diiwaangelisaa baaritaankaaga bosatiifka ah [Service NSW website \(website Adeegga NSW\)](#) sidaa daraadeed, waxaa lagugu xiriirin karaa taa-geerada daryeelka caafimaadka mu-hiimka ah iyo tallo ku saleysan khatartaada COVID-19. Haddii adiga ama qof qoyskaaga ah uusan online iska diiwaangelin karin, fadlan ka wac Adeegga NSW 13 77 88.

Haddii lagaa helo xannuunka oo aad bosatiif ku noqoto baaritaanka PCR ama antigen ka degdega ah, waa inaad:

1. Isla markiiba 7 maalmood isgooni yeeshaa. Xubnaha goyskaagu waa inay sidoo kale is gooni yeelaan 7 maalmood. Haddii aad qabto cune xannuun, sanko oo ku dareeraya, qufac ama neeftu ay ku qabato 7 maalmood ka dib, fadlan isgooni yeelkaas ku sii jir ilaa iyo 24 saac ka dib marka astaamahaagu kaa baaba'aan.
2. U sheeg dadka aad wakhti la qaadatay laga bilaabo 2 maalmood ka hor markii aad yeelatay astaamaha ama 2 maalmood ka hor intaadan bosatiif noqon (hadba kii soo hormara) inaad qabtid COVID-19. Tan waxaa ku jira xiriiradaada bulshada, goobta shaqada iyo/ama dugsiiga.
3. La soco astaamahaaga. Haddii aad wax saluugsan tahay waa inaad wacdaa Dhakhtarkaaga GP, NSW Health COVID-19 Care at Home Support Line (Khadka Taageerada Guriga ee Daryeelka Caafimaadka NSW COVID-19) ee 1800 960 933 ama National Coronavirus Helpline (Khadka caafimaada Qaranka ee Coronavirus) ee 1800 020 080. Haddii astaamuhu ay ka sii daraan wac 000.

Sidee baa loo maareyn doonaa COVID-19?

Markaad ku diiwaangelisid natiijadaada bosatiifka ah ee RAT online ama taleefan, waxaa lagu weydiin doonaa inaad ka jawaabtid su'aalo naga caawinaya inaan go'aamino inaad khatar ugu jirto qaadida xannuun daran. Haddii aad leedahay natiijo bosatiif PCR ah, waxaa laguugu soo diri doonaa xiriir su'aalahaas oo kale fariin qoraal ah. Fadlan uga soo jawaab sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

Waxaa sidoo kale lagu soo diri doonaa tallo ah inaad is gooni yeeshid iyo sidii aad ugu daryeel lahayd naftaada guriga. Haddii aad khatar ugu jirtid cudur daran NSW Health waxay ku weydiin doontaa waxoogaa su'aalo ah oo intaas ka sii badan. Tani waa in la jeegareeyo inaad u qalanto ka hortaga fayraska ama daaweyn hore oo kale ee COVID-19. Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso magaca GP-gaaga ama rugta caafimaadka ee GP-ga saa daraadeed kooxaha rugta caafimaadka ee NSW Health wuxuu kala xiriiri karaa iyaga wax ku saabsan daryeelka.

Haddii aad ka yar tahay da'da 65 sanno jir, oo aad qaadatay tallaalka COVID-19 oo ah laba qadar, oo aysan ku heyn xaalad caafimaad oo soo noqnoqota, uurna aadan lahayn, waxaad awoodaa inaad si amaan ah guriga nafsadaada ugu daryeeshid. Dadka badidiisa ee qaba COVID-19 waxay yeelan doonaan jiro fudud waxayna kaga bogsanayaan maalmo yar gudahood ama sidaas oo kale, iyadoo dadka qaarkii wax astaamo ah gebi ahaanba aanay lahayn. Waxaad la xiriiri kartaa NSW Health wixii daryeel ah ama tallo wakhti kasta inta lagu jiro jirradaada.

Astaamaha badidooda waxaa lagu maareyn karaa:

- sariir ku nasasho
- kiniiniga barasitamoolka iyo ibuprofen si ay kaaga debciyaan xannuunka iyo xumadaha
- kiniiniga cunaha ee cunne xannuunka
- Ilaalinta inaan biyo la'aan kugu dhicin adoo si joogta ah biyaha u kabanaya.

Sii wad inaad qaadata wixii biyo ah ee si caadi ah laguugu qoray. Haddii aadan hubin wixii ku saabsan sii wadida qaadashada daawadaada hadda ama daaweynta, aad wax saluug ah ka qabtid caafimaadkaaga, wac dhakhtarkaaga.

Fadlan la xiriir dhakhtarkaaga GP – ga ama ka wac **NSW Health COVID-19 Care at Home Support Line 1800 960 933** haddii lagu arko inaad khatar aad u sareyso ugu jirtid cudurkan daran. Dadka loo arko inay khatar aad u sareyso ugu jiraan cudur daran waxaa ka mid ah:

- Dumarka uurka leh (arag [What if I am pregnant and have COVID-19? \(Ka waran haddii aan uur leeyahay oo aan qabo COVID-19?\)](#))
- Aboorinjinka iyo Torres Strait Islander (gaar ahaan kuwa qaba xaallado caafimaad oo hoos imanaya)
- Dadka Pacific Islander ka ah
- Aan tallaaleyn (16 sanno iyo ka weyn)
- Difaaca jirkoodu hoos loo dhigay

Da'da weyn ayaa ah qodob khatar u ah jirro daran, gaar ahaan marka lagu daro xaalado hoos imanayao oo weyn. Waxaa jira daaweyn wax ku ool ah oo ay helayaan dadka khatarta ugu jira cudurka daran ee COVID-19.

la socio astaamahaaga

Weydii nafsadaada su'aalahaan saddex jeer maalin kasta (subax, galab iyo habeen):

Su'aal	Ku jawaab maya	Ku jawaab maya
Dhib miyey iga heysataa cabitaanka iyo cunnitaanka?	Sii wad inaad si caadi ah wax u cabto oo aad u cunto.	Qaado kabashooyin badan oo biyo ah, Hydralyte ama Hastrolyte. Haddii aadan fiicnaan, wac 1800 960 933 ama GP-gaaga.
Miyaan kaajaa kaadi aad uga yar caadi ahaan?	Sii wad inaad biyaha cabto.	Cab iyo badan, Hydralyte ama Hastrolyte. Haddii aadan fiicnaan, wac 1800 960 933 ama GP-gaaga.
Miyaan dareemaa wareer yar ama madax wareer markaan guriga ku dhex socdo?	Sii wad inaad raacdo tallada NSW Health si aad ugu maareyso COVID-19 guriga.	Cab iyo badan, Hydralyte ama Hastrolyte. Haddii aadan fiicnaan, wac 1800 960 933 ama GP-gaaga.
Miyaan dareemayaa wareer aad u daran, hurdo ama jahwareer?	Sii wad inaad raacdo tallada NSW Health si aad ugu maareyso COVID-19 guriga.	Wac Saddexda Eber (000) islamarkiiba oo u sheeg shaqaalaha ambalaasta inaad qabto COVID-19.

Su'aal	Ku jawaab maya	Ku jawaab maya
Miyey dhib iga heysataa neefsiga ama mise dareemaa culeys xabbadka ah ama xannuun qaata 10 daqiiqo wax ka badan?	Sii wad inaad raacdo tallada NSW Health si aad ugu maareyso COVID-19 guriga.	Wac Saddexda Eber (000) islamarkiiba oo u sheeg shaqaalaha ambalaasta inaad qabto COVID-19.
Miyaan dareemaa inaan suuxayo markaan istaago?	Sii wad inaad raacdo tallada NSW Health si aad ugu maareyso COVID-19 guriga.	Wac Saddexda Eber (000) islamarkiiba oo u sheeg shaqaalaha ambalaasta inaad qabto COVID-19.

Haddii aad u baahan tahay taageero kale oo caafimaad ama aad qabtid su'aalo caafimaad oo aan degdeg ahayn intaad isgooni yeelaysid, ka wac **NSW Health COVID-19 Care at Home Support Line 1800 960 93**.

Maxaan u baahan ahay inaan sameeyo?

Adiga iyo kuwaad la xiriirto ee goyskaaga waa inaad isku gooni yeeshaan guriga

Waa inaad isku gooni yeeshaa guriga ilaa 7 maalmood laga bilaabo maalinta lagu baadhay, xitaa haddii aad si buuxda u tallaalan tahay. Inaad si gooni yeesho micnaheedu waxaa weeye joogida gurigaaga ama hoygaaga iyo ka soocnaanta dadka kale. Fadlan arag [Self-Isolation Guideline \(Tusaha isgooniyeelida\)](#) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sidii aad isu gooni yeeli lahayd iyo wixii taageero ah ee aad heli kartid haddii aad u baahatid.

Waa inaad u sheegtaa dadkaad la nooshahay inaad qabtid COVID-19. Xirriirada goyskaaga waa inay iyaga laftigoodu ay isgooni yeelaan 7 maalmood, oo ay sameeyaan baaritaanka degdega ah ah antigen (RAT) sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah iyo mar labaad Maalinta 6aad (eeg [Information for people exposed to COVID-19 \(Macluumaad loogu talagalay dadka wajahay COVID-19\)](#) oo [Get tested for COVID-19 \(Iska baar COVID-19\)](#)).

Khadka Taageerada Isgooni yeelida Caafimaadka NSW, waxaa laga helayaa caawimaad ficil ah inta lagu jiro isgooni yeelida 1800 943 553.

U sheeg bulshada dadkaad xiriirka la leedahay in lagaa helay xannuunka oo aad bosatiif noqotay.

Baaritaan bosatiif ah oo COVID-19 ah micnaheedu waxaa weeye waxaa laga yaabaa inaad ku faafiso COVID-19 dadka kale. Waxaa laga yaabaa inaad qabtay caabuqa laba maalmood ka hor intaadan yeelan astaamaha. Ama laba maalmood ka hor markii aad bosatiif noqotay haddii aadan lahayn astaamo.

Waa inaad sheegtaa xiriir kasta oo bulsho oo aad wakhti la qaadatay adoo caabuqa qaba aad bosatiifka noqotay. Tan waxaa ku jira saaxiibadaa iyo dadka kale ee aad kula kulantay bulshanimo, dadkaad kula kulantay baarka, kalaabka ama munaasabad bulshadeed, qoys ama saaxiibo gurigaaga soo booqday.

U sheeg xiriiradaadu inay qiimeeyaan khatartaada iyo talaabooyinka ku xigga adoo isticmaalaya [Information for people exposed to COVID-19 \(Macluumaad loogu talagalay dadka wajahay COVID-19\)](#) si aad u qaadatid baaritaanka degdega ah ee antigen.

U sheeg goobtaada shaqada ama goobta waxbarashada in lagaa helay xannuunka

Waa inaad sidoo kale u sheegtaa maareeyaha shaqadaada ama madaxa tasiilaadka waxbarashada/ xubinta shaqaalaha ee ay khuseyso inaad bosatiif COVID-19 ah noqotay haddii aad joogtay gudaha markii aad caabuqa qabtay.

U sheeg iyaga taariikhda baaritaankaaga, maalintaad jiratay (haddii aad astaamo leedahay), iyo maalmahaad shaqada/dugsiga joogtay adoo caabuqa qaba. Waxay isticmaali doonaan macluumaadkan si ay u qiimeeyaan khatarta ay ku jiraa saaxiibadaada shaqadu ama ardeydu. Goobtaada shaqada/dugsiga waxaa laga yaabaa inay wargeliyaan iyaga inay wajaheen COVID-19, iyo tallaabada la rabo inay qaadaan.

Waxaad ugu sheegi kartaa maareeyahaaga taleefan ama fariin ama weydii saaxiib aad wada shaqeysaan inuu u sheego iyaga. Haddii aad tagtay tas-hiilaad waxbarasho, waxaad wici kartaa lambarka guud ee kambaska aad tagtay.

Ka waran haddii aan uur leeyahay oo aan qabo COVID-19?

Dumarka uurka leh, ee ah 14 toddobaad iyo wixii ka badan, khatartooda inay dhib kala kulmaan COVID-19 waa ka sareysaa.

Haddii aad COVID-19 bosatiif noqoto oo aad 14 toddobaad wax ka badan uur leedahay, waa muhiim inaad u sheegtid adeeg bixiyahaaga hooyada. Tan waxaa laga yaabaa inay noqoto dhakhtarkaaga GP-ga, umulisada, dhakhtarkaaga dumarka ama adeega hooyada ee xaafada.

Dumarka uurka leh badidoodu waxay awoodi doonaan inay si amaan leh guriga u joogaan intay qabaan COVID-19. Inta wakhtigan lagu jiro, waa muhiim in:

- Aad cabtid dareere fara badan, sidii aad sameyn lahayn haddii uu kugu dhaco hargabka ama flu-ga caadiga ah. Haddii aad xannuunsaneynsid, waxaad sidoo kale qaadan kartaa baarsatamool si uu kaaga caawiyo astaamaha. Ibuprofen laguma tallinayo qaadashadiisa intaad uurka leedahay. Waa muhiim inaad si joogta ah u dhaqdhaqaaqdo si aad u yareyso khatarta aad ku yeelan karto xinjirowga dhiiga.
- Waa muhiim inaad si dhow aad isha ugu heysid dhaqdhaqaaqa ilmahaaga. Wac isla markiiba daryeel bixiyahaaga hooyada **haddii dhaqdhaqaaqa ilmahaagu isbedelo** ama haddii aad isku aragtid:
 - Ferjiga oo ku dhiiga
 - Xannuun uur ku jirta ah
 - wax biyo cad oo kale ah oo kaa yimaada ferjiga
 - in lagu qabto wakhti kasta oo ka horeeya toddobaadka 37aad
 - xumad aan kaa tegin
 - Madax xannuun
 - barar lama filaan ah oo gacmahaaga iyo wajigaaga ah
 - waxaad ku haysa fool
 - haddaad ka qabtid wax welwel aad u daran oo ku saabsan uurkaaga.
- Haddii ay dhibi kaa heyso neefsiga, aad yeelato xannuun ama caddaadis xabadka ah, aad leedahay madax xannuun daran ama wareer waa inaad isla markiiba wacdaa 000. Waana inaad hubisaa inaad u sheegtid inaad qabtid COVID-19 oo aad uurna leedahay.
- Markaad ka bogsato COVID-19 waa muhiim inaad sii wadatid daryeelkaaga joogtada ah ee dhalmada ka hor. Haddii aad gaftay ballanta dareyeelka dhalmada ka hor intaad ku jirtay isgooniyeelida, dib u ballanso sida ugu dhakhsaha badan ee suurtaglka ah.

Sidee baan u maareeyaa ilmaha dhashay ama ilmaha qaba COVID-19?

Badiba carruurta COVID-19 bosatiif noqota si sahlan bay ugu xannaaneyn karaan guriga xannaaneeyayaashooda qoyska ee caaddiga ahi, xitaa haddii aysan tallaalneyn. Dadka qaba COVID waa inay iska soocaan xubnaha kale ee qoyskooda ilaa intay awoodaan. Xiriirada xubnaha qoyska ee aan awoodin inay iska gooni yeelaan qofka qaba COVID ka, waa inuu iyaga isla gooni yeelaa ilaa laga fasaxo isgooni yeelida oo raac waxa baaritaanku kaa rabo ee [information for people exposed to COVID-19 \(Macluumaadka dadka wajahaya COVID-19\)](#). Markaad ku xannaaneynaysid ilmahaaga oo COVID-19 qaba guriga:

- ugu labis ilmahaaga dhar ku haboon, si ay ugu raaxeystaan – oo aysan u dhididin ama dhaxamoon
- sii ilmahaaga cabitaan fara badan oo ay cabbaan. Waxaa laga yaabaa inaysan dareemin inay cabayaan wax badan saa daraadeed waxay u baahan yihiin caawimaadaada iyo dhiirigelintaada.
- Haddii aad naaska nuujineysid ama formula ku quudisid ilmahaaga waxaa laga yaabaa inuu u baahdo in marar badan la quudiyo. Naas muujintu waa u amaan inay sii socoto haddii adiga iyo/ama ilmahaagu aad qabtaan COVID-19.
- ku dhiirigeli inay nastaan oo aysan ka badbadin
- Isticmaal baarsatamool ama ibuprofen, haddii aad u maleynayso oo kaliya in ilmahaaga xannuun hayo ama uu u muuqdo xumad daraadeed inuusan deganeyn. Raac tilmaamaha ku qoran warqada ku dhegan, hana siin wax ka badan daawadaan inta lagu taliyey xili dhan 24 saac, maadaama tan laga yaabo inay carruurta khatar badan u leedahay.
- ka fiiri ilmahaagu inuu leeyahay calaamado sheegayo in jiradoodu ka sii dareyso.

La soco xaalada ilmahaaga oo wac GP-gaaga ama **NSW Health COVID-19 Care ee Home Support Line ka 1800 960 933 (8:30 subixii ilaa 8:30fiidkii) ama National Coronavirus Helpline ka 1800 020 080 (24/7)** haddii aad ogaatid:

- xumad aan tegaynin (>39°C) oo aan daaweyntu waxba ka tareynin
- neef qabasho fudud
- cabida wax ka yar kala bar wixii ay caadi ahaan cabi lahaayeen
- kaadida ka imanaysa oo kala bar ka yar intii caadiga ahayd, iyo kaadida oo midabkeed u mugdi yahay
- matagid dhexdhexaad ama shuban
- aanu awoodeyn istaagid ama socod

Haddii aad ka welwelsan tahay in ilmahaagu uu aad u xannuunsanayo, oo neefsigu ku adag yahay, uu si aad ah biyo yaraan u heyso ama suuxid, fadlan wac Saddexda Eber (000) islamarkiiba oo u sheeg xiriiriyaha inuu ilmahaagu qabo COVID-19

Markaan ka bixi karaa isgooni yeelida?

Haddii aadan qabin wax astaamo ah Maalinta 7aad

Waa inaad isgooni yeeshaa 7 maalmood laga soo bilaabo maalintaad isbaartay. Waxaad ka bixi kartaa oo kaliya is gooniyeelida 7 maalmood ka dib haddii aadan qabin cune xannuun, sanko oo ku dareeraya, qufac ama neefta oo ku qabanaysa. Haddii aad sameysay baaritaanka PCR ama aad diiwaangelisay baaritaankaaga degdega ah ee antigen oo bosatiif ah, waxaad ka heli doontaa SMS Caafimaadka NSWd, laakiinse uma baahnid inaad sugtid SMS kan si aad uga baxdid isgooni

yeelida haddii ay ahayd 7 maalmood ilaa markii lagu baaray. Tusaale ahaan, haddii lagu baaray 10ka subixii oo Talaado ah, waxaad ka bixi kartaa isgooni yeelida 10ka subixii Talaadada soo socota haddii aadan qaban wax ka mid ah astaamahan. Uma baahnid inaad isbaartid intaadan ka bixin isgooni yeelida NSW dhexdeeda.

Xiro maaski markaad u dhow dahay ama aad la hadlaysid dadka kale iskana ilaali booqashada goobaha daryeelka caafimaad, daryeelka dadka waa weyn, daryeelka naafada ama tahsiilaadka sixitaanka anshaxa) ilaa 3 maalmood oo dheeraad ah. Haddii aad ka shaqeysid goobahan wax ka mid ah la hadal loo shaqeeyahaaga ka hor intaadan ku laaban. Haddii aad leedahay nidaamka difaaca jirka oo aad u daciifay (sida inaad tahay qof xubin jirka ah laga bedelay ama aad qaadatid daawada kiimiyotharabi) waa inaad ka sii taxadaridaan aad qaadata ilaa 4 maalmood oo dheeraad ah (wadar dhan 7 maalmood oo ku xigta markii lagaa fasaxay isgooni yeelida).

Haddii aad leedahay astaamo Maalinta 7aad

Haddii cune xannuun aad leedahay, sanko oo ku dareeraya, qufac, neefta oo ku qabata 24saac ee ugu danbeeyey ee isgooniyeelidaada. Fadlan ku jir isgooni yeelida ilaa 24 saac ka dib marka astaamahaagu baabaan. Haddii aad wax ka welwelsan tahay, wac GP-gaaga.

Xiro maaski markaad u dhow dahay ama aad la hadlaysid dadka kale iskana ilaali booqashada goobaha daryeelka caafimaad, daryeelka dadka waa weyn, daryeelka naafada ama tasiilaadka sixitaanka anshaxa) ilaa 3 maalmood oo dheeraad ah. Haddii aad ka shaqeysid goobahan wax ka mid ah la hadal loo shaqeeyahaaga ka hor intaadan ku laaban. Haddii aad leedahay nidaamka difaaca jirka oo aad u daciifay (sida inaad tahay qof xubin jirka ah laga bedelay ama aad qaadatid daawada kiimiyotharabi) waa inaad ka sii taxadaridaan aad qaadata ilaa 4 maalmood oo dheeraad ah (wadar dhan 7 maalmood oo ku xigta markii lagaa fasaxay isgooni yeelida).

Haddii aad leedahay astaamo kale 7 maalmood ka dib (tusaale, xumad, madax xannuun) oo aan ka soo fiicnaaneyn waxaad ka bixi kartaa isgooni yeelida laakiinse waa inaad la xiriirtaa GP-gaaga.

Haddii ay ku jirto daryeelka koox caafimaad, kooxdaada ayaa kuu sheegi doonta marka lagaa fasaxi doono isgooni yeelida.

Weli ma u baahant ahay inaan isbaadho ka dib marka layga fasaxo isgooni yeelida?

Baatitaanka joogtada ah ee COVID-19 (sida baaritaanka la socoshada ee dugsiya iyo goobta shaqada) laguma talinayo in la sameeyo ilaa 8 toddobaad ka dib ka dib marka lagaa fasaxo isgooni yeelida. Ka jeegaree maareeyahaaga.

Maxaa dhacaya haddii aan wajaho qof qaba COVID-19 mar labaad?

Dadka ka bogsaday COVID-19 khatarta inay mar labaad qaadaan 8 toddobaad gudahood way hooseysaa ka dib marka lagu fasaxo maadaama dadka badidoodu ay yeeshaan waxoogaa difaac (awood ay kula dagaalamaan cudurka).

Haddii aad la kulantid qof qaba COVID-19, 8 toddobaad gudahood kadib marka lagu fasaxo, guud ahaan uma baahan doontid inaad isgooni yeeshid ama aad isbaartid. Haddii aad la kulantid qof qaba COVID-19 wax ka badan 8 toddobaad ka dib marka lagu fasaxay, waxaad u baahan doontaa inaad isgooni yeeshid, oo aad isbaartid raacdidna tallada [Information for people exposed to COVID-19 \(Macluumaadka dadka wajahay COVID-19\)](#) oo [Get tested for COVID-19 \(iska baar COVID-19\)](#) waraaqaha xaqiiqda.

Waa maxay sida ugu dhakhsaha badan ee aan isu tallaalayo?

Ka dhaafitaanka tallaalka si ku meel gaar ah waxay khuseysaa ilaa lix toddobaad laga bilaabo maalinta fasaxa ee ogeysiinta caafimaadka. Ka dhaafidaani wuxuu ka shaqeynayaa NSW gudaheeda oo kaliya. Haddii aad dooneysid in lagu tallaalo shaqo dardar, dugsi, ama nashaad kale oo ku yaal gobol kale, fadlan jeegaree xeerarka khuseeya gobolkaas ama territoriga.

Haddii aad u qalantid inaad qaadatid tallaalka xoojinta, waxaad qaadan kartaa isla markaad si buuxda uga bogsatid caabuqa la xaqiijiyey, sababtoo ah dadka badidoodu tani waa qiyaastii 4-6 toddobaad ka dib bilowga caabuqa. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg [COVID-19 vaccines: Frequently asked questions \(COVID-19 tallaalada: su'aalaha badanaa laysweydiyo\)](#) iyo [NSW Health Booster vaccination: Frequently asked questions \(su'aalaha badanaa lays weydiyo iyo tallaalka xoojinta ee Caafimaadka NSW\)](#).

Waa maxay taageerada aan helayo intaan ku jiro isgooni yeelida?

Taageerada caafimaadka dhimirka

- NSW Mental Health Line – 1800 011 511
- Beyond Blue helpline – 1800 512 348
- Lifeline – 13 11 14
- Kids Helpline – 1800 55 1800
- Service NSW [mental wellbeing resources](#) (Ilaha macluumaadka fayoaqabka dhimirka ee Service NSW)

Taageerada qalalaasaha qoyska

- Khadka qalalaasaha qoyska iyo waxyeelada galmada ee qaranka 1800 RESPECT (1800 737 732)

Caafimaadka NSW waxay la shirkowday [Sonder](#) oo bixisa adeega fayoaqabka shakhsiyeed oo ah 24/7 helitaanka la hadalka luuqadaha badan iyo ku helida taleefanka adeegyada taageerada fayoaqabka iyo caafimaadka, iyo caafimaadka dhimirka oo kala duwan.

Caawimaada luuqadaada

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan kala xiriir **Adeegga Turjumaada Afka ah iyo Taqoraalka ee (TIS National)131 450**. Adeegani waa bilaash xogtiisu qarsoon tahay.